

How to contact us:
PHONE: 612-627-0160

September 2006



MessageBRIEF
Youth Community Connections
Minnesota's Statewide Afterschool Alliance

Horumarinta Dhalinyaradu waa Horumarinta Bulshada

Cid walba ee ku nool Minnesota waxaa ka saran waajib inuu xaqiijiyo in dhalinyaradeennu noqdaan kuwa waxtar u leh dadkooda.

Waxaan ka hadalnaa "horumarinta Bulshada" annagoo ka fiirineyna xagga ganacsiga iyo Guryaha. Laakiin, lafdhabarka bulsho kasta waa dadka oo adag, naxariis leh fahmana danta guud diyaarna u ah adeegga bulshadooda.

Carruurta iyo dhallinta maanta waa dadka berrito aan ku tiirsanaan doonno--- sida shaqaalaha, madaxda, cod-bixiya-yaal (voters), saaxiibbo, iyo derisyo. Dhammaanteen waxaan uga baahannahay inay xalliyaan Mashaakillada, gaaraan go'aanno muhiim ah, nana daryeelaan markaan gaboowno.

SII WAD WAXBARASHO SAX AH OO LEH WAAYA-ARAGNIMO

Haddeer, waa inaan siinna dhalliinteenna waxbarasho leh waaya-aragnimo, si ay ugu koraan Muwaadiniin xil-kas ah, shaqaale iyo qoysas waxtar leh. Hal si ay sidaas ku noqon karaan waa inaan ugu deeqnaa hadda barnaajmiyo ku saleysan horumarinta bulshadooda.

Daraasado la sameeyay ayaa muujinaya dhalliinta ka qayb-qaadata mashaariicda lagu hormarinaayo dhalliinta inay noqdaan dad ay qoysaskooda iyo bulshadoodaba ku faanto- dad fificoon,, codbixiyayal, dhaqaala ahaan isku filan, ku nagaada xiriirada dhexdooda, kuna faraxsan noloshooda.

Tani waa tusaale sida mashaariicda ku saleysan horumarinta bulshada ay u shaqeyso. Marka dhalliin naftooda horayaal ah ay ku biiraan saynisyahanno mashaariicda dhalliinyarada si ay u caawiyaan dib-usoo Nooleynta Dhulalka qoyan ee Minnesota (Minnesota wetlands), dhulka qurxoon oo keliya ma soo celinayaan ee waxay abuurayaan xiriirro, waxay yeelanayaan isku-kalsoon iyo ayagoo adeegga mujtamacooda u jajaban.

Marka dhalinta ay helaan fursado bulshadooda xiriiradaan oo kale kula sameystaan , maskaxdooda waxay u kortaa sida fiican, una sahashaa ka qayb-qaadashada horumarinta bulshadooda. Markaas waxay gaaraan go'aan qaadasho fiican, ixtiraamaanna dadkooda. aragnimada ay waalidka oo dhan la jecel yihiin carruurtooda--waa fursado ay ku gaaraan waaya-aragnimo,

kuna "tijaabiyaan baalashooda", inta ay weli ku guda jiraan gacanta ilaalisa ee bulshadooda.

Kuwaanoo dhan waa mashariicda horumarinta dhalliinyarada. Waxayna ka socdaan golyaasha bulshada, ururada aan ahayn faa'iido donka, dugsiyada, goobaha diimaha, iyo meela kaleba kuwaasoo leh mashaariic Habeysan iyo dad waaweyn oo xilkas ah.

Mashruuc kasta wuxuu ka caawiya dhalinta inay bartaan awooddooda, fahmaanna xiriirada dhexdooda iyo waajibaadka ka saaran dadka intiisa kale. Mashruuc walba wuxuu u fidiyaa dhalinta kuwa gaari kara go'aanno xor ah kuna tijaabiyaan waxyaabaha ay ka barten guryahooda iyo dugsiyadooda.

FAAIDOOYINKA DHALINYARADA...IYO BULSHADOODA

Dhalinta ka qayb qaadata mashariicdaan, waxay joogteeyan waxbarashadooda, buundooyin fiican ka keenaan waxbarashadooda, una hayaan niyad dugsiyadooda, raja weyna ka qabaan inay waxbarashada Dugsiya Sare kaddib sii wataan. Inta badan, waa ay ka qeyba qaadataan waxyaabaha duwan ee ka socda deegaankooda, saaxiibbo ayey leeyihiin, aaminsan yihiin waalidkood isla markaan aad ayey naftooda ugu kalsoon yihiin iyo bulshadoodaba.

Inyar oo reer Minnesota ah waxey fahamsan yihiin waa in meela badan oo gobolka ka mid ah aanay Kaba jirin mashaariic dhallinta lagu hormarinaayo, amaba ay kasii baaba'ayaan.

Miisaaniyad dhimid badan, iyo qarashka badan ee qoysasku, iyo sare u kaca ku yimid qiimaha shidaalka Ayaa ka dhigay fursadahaan inay awoodi waayaan qoysas iyo mutamacyo badan si waditaanka mashaariicdaa waxtarka u leh bulshada.

Hadda waxaa jira baahi xooggan iyo daneyn badan indib loo soo nooleeyo goobahaan ay ka socon jireen mashariicdan dhalliinta lagu daryeeli jiray. Si dhalliinyarada loogu sameeyo meelo ay ku horumarin karaan Dhaqdhaqayadooda. Nagala soo qaybgald u raadinta dhalliinyaradeenna soo koreysa. In loo soo nooleeyo mashariicdaas oo kale.